

Tallaabooyin sax oo waqti sax  
ah la sameeyo – istaraatiijiyadda  
xukuumadda ee ka shaqeynta  
caabuqa korona



Tallaabooyin sax oo waqti sax ah la sameeyo – istaraatiijiyadda xukuumadda ee ka shaqeynta caabuqa korona

**caabuqa cusub ee korona (coronaviruset) wuxuu tijaabinayaa bulshadeenna. Waqtiyadii ugu dambeeyay waxey xukuumadda soo bandhigtay tallaabooyin kala duwan si loo difaaco nolosha dadka, caafimaadka iyo shaqooyinka.**

- Xaaladdaan adag waxey socon doontaa muddo dheer. Xaalku wuu sii adkaan doonaa. laakiin bulshadeenna waa mid awood leh. Haddii qof walba uu qaado masuuliyadda saaran si wada jir ahaan ayaan uga soo baxeynaa xaaladdaan adag, waxaa sidaas yiri raysul wasaare Stefan Löfven.

Hadafka guud ee laga leeyahay shaqada xukuumadda waa in la yareeyo xowliga isqaadsiinta cudurka, taasoo micnaheedu yahay in la simo xariiqa jaantuska ee dadka uu xanuunka soo ridayo. intaas kadib ujeedka shaqada iyo go'aamada dowladda waa: Xakameynta faafidda cudurka ee dalka

- In la xaqiijiyo oo la sugo agabka caafimaadka iyo daryeelka bukaanka
- Xakameynta saameynta uu ku yeelanayo adeegyada muhiimka ah ee bulshada
- In la yareeyo cawaaqibta uu ku yeelanayo muwaadiniinta iyo shirkadaha
- In la yareeyo walwalka
- In tallaabo sax ah la qaado waqti sax ah

Tallaabooyinka ey qaadayaan dowladda iyo hey'adaha si loo xakameeyo faafidda cudurka waxey u baahan yihiin in ey la jaanqaadaan saameynta ey ku yeelanayaan bulshada iyo caafimaadka dadweynaha gebi ahaanba. tallaabooyinka la qaadayo waa kuwo mar walba tijaabin lagu sameynayo mar walba ey xaaladda is bedesho.

**DARIISHAD XAQIIQO:**

**Warbixin dheeraad ah iyo hey'adaha masuulka ka ah**

Shaqada maareynta xaaladaha adag ee Iswiidhan waxey ka duulaan madda'a masuuliyad qaadidda. taas oo ka dhigan in cidda masuulka ka ah good shaqo waqtiga ey xaaladda caadiga tahay isla asaga ayaa masuul ka ah xilliga xaaladaha adag. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida Iswiidhan loo xukumo

Boggakrisinformation.se waxaa laga helayaa warbixin sugan tii ugu dambeysay oo ka socota hey'adaha masuulka ah waxeyna ku qoran yihiin luqado badan.

Krisinformation.se

*Bedelka ( qeybta iswiidhishka ku qoran):*

Halkan waxaa laga helayaa leeman uruursan oo warbixin laga helayo iyo macluumaadka lagala xiriiro hey'adaha masuulka ah.

Talooyin iyo warbixin ku saabsna cudurka cusub ee korona – leemanka bogag internetka ee hey'adaha

Raadiyaha Iswiidhan wuxuu daayaa warar luqado kale ku baxa:

Warar ku saabsan cudurka cusub ee korona oo luqado kale ku baxa ayaa laga sii daayaa

Raadiyaha Iswiidhan